



Orientation to Ontario

DIFAACA MACAAMIISHA

DIFAACA MACAAMIISHA

Kuligeen waxaan door ka qaadanaynaa difaaca macmiilka. Dawlada ayaa dejinaysa sharciyada difaacaaya macaamiisha shirkaduhuna waa qasab inay ku dhaqmaan sharciyada difaaca macaamiisha iyo xogta shaqaalaha. Hase yeeshee, qof kasta oo ku dhaqan Canada waa inuu qaadaa talaabooyin uu ku difaacaayo naftiisa.

- Xafiiska Arimaha Macaamiisha ayaa xog ka bixinaaya mawduucyada badan ee difaaca maamiisha oo laga heli karo consumerinformation.ca
- Xarunta la Dagaalanka Khiyaannada ee Canada ayaa uruurisa lana wadaagta dadka xog ku saabsan khiyaannada macaamiisha loo gaysto barta antifraudcentre-centreantifraude.ca

XATOOPYADA AQOONSIGA

Xatooyada aqoonsigu waa marka qof uu adeegsado xogtaada gaarka ah adiga oo aan u ogolaan si uu ugu galo danbi. Tuugada aqoonsiga ayaa adeegsan kara aqoonsigaaga si ay u xadaan lacagtaada ama u adeegsadaan kaarkaaga daynta inay wax ku iibsadaan. Waxay sidoo kale u adeegsan karaan aqoonsigaaga si ay ugu galaan danbiyada kale ayagoo adeegsanaaya magacaaga.

Aad ayay muhiim u tahay inaad difaacdo xogta iyo dukumiintiyada soo socda:

- Lambarka Caymiska Bulshada
- Lambarka ruqsada darawalka
- Lambarka kaarka caafimaadka

- Xogta gaarka daynta iyo bangiga
- Kaarka bangiga
- Shahaadada dhalashada
- Baasaboorka
- Fiisada ama ogolaanshaha waxbarashada

Waxaa jira qaabab badan oo tuugadu ay ku xadi karaan aqoonsigaaga. Waxaywaraaqda boostada kala bixi karaan sanduuqaaga boostada, ama waxay xadi karaan boorsadaada kaararka, boorsada, ama kiishada. Tuugadu waxay sidoo kale waraaqo iyo dukumiintiyada muhiimka ah ka qaadan karaan gurigaaga, gaariga, qaanada ama xataa qasacyadaada qashinka iyo alaabta warshada lagu cesho.

DIFAACA OONLAYN

Adeegga bangiga iyo dukaamaysiga ee oonlaynka ah ayaa sii kordhinaaya khatartaada tuugada aqoonsiga. Xogtaada ayaa laga xadi karaa kumbuyuutarka. Aad u taxadar marka aad isticmaalayso kumbuyuutarada dadwaynaha sida kuwa yaala maktabadaha iyo xarumaha kumbuyuutada. Mar kasta ka bax iimeelkaaga iyo webseedyadaada. Haku kaydin baasweerkaaga webseedyada oo tirtir taariikhda baaristaada barta.

- Haka jawaabin iimeellada ka yimaada dadka aad ka shikday ee aadan aqoon ee kaa codsanaaya xogta shaqsiga ah.
- Ha gujin lifaaqyada fariimaha ka yimaada dadka aan ku aqoon.
- Ha aaminin fariimaha iimeelka ee baxsha abaal marinnada, hadiyadaha, ama qaababka degdega ah ee lacagta lagu helo.

Funded by / Financé par

- Marna hala wadaagin baasweerkaaga cid kale oo baasweerka ka dhig mid aan la qiyaasi karin.
- Ka feejignooow sameynta iibabka aad wax uga iibsano webseedyada, sida eBay, Craigslist, iyo Kijiji; lacag ha u dirin dad aadan aqoon.

KAHORTAGA

Marka aqoonsigaaga la xado waxaa adkaan karta xalinta dhibaata. Sumcadaada daynta ayaa xumaan karta sanado badan, waxaana kugu adkaan karta inaad hesho ciwaanka taleefanka gacanta, kaarka daynta, ama xataa daynta guryaha.

Xog badan ka ogoow difaacida Lambarkaaga Caymiska bulshada oo aad ka helayso ervice Canada. Booqo servicecanada.gc.ca ama findlink.at/IS-SIN

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku aadan ilaalinta xogtaada shaqsiga ah, booqo webseedka Dawlada Ontario oo ah ontario.ca ama findlink.at/persinfo

WARBIXINNADA DAYNTA

Warbixintaada daynta ayaa xog ka uruurinaysa dhammaan dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha, ayna ku jirana bixinta lacagaha daynta, kaararka daynta, koontooyinka taleefanka iyo interneedka iyo biilasha kale. Lacagaha lala soo daaho ama la bixin waayo ama inaad bixin waydo biilasha ayaa hoos u dhigaysa sumcadaada daynta. Tan ayaa saamayn doonta awoodaada qaadashada daynta ama amaahda guriga.

Wax badan ka ogoow warbixinnada daynta ee gudaha Ontario adoo booqanaaya webseedka Difaaca Macaamiisha ee Ontario oo ah ontario.ca ama findlink.at/credreport



OGEYSIIS MUHIIM AH

Haddii aad isleedahay aqoonsigaaga ayaa la xaday, waxaad digniinta khiyaannada saari kartaa warbixinta kaarkaaga daynta adoo la xariiraaya wakaaladaha soo socda ee warbixinta daynta: Equifax: 1-800-465-7166 iyo Trans Union: 1-877-525-3823



MA OTAHAY?

Macaamiisha ayaa masuul ka ah difaaca kaararkooda bangiga iyo daynta iyo Lambarada Aqoonsigooda Gaarka ah (BIIN-ka). Waa inaad soo sheegtaa kaararka luma kadibna la helay si loo xiro. Haddii aad qof siiso BIIN kaaga, waxaad masuul ka noqon kartaa falalka khiyaannada ah ee uu galo qofku.

